



Date: 23-Oktober 2017

Bayaan kasoo baxay shirkii guddiga agaasinka

Xubnaha Guddiga Agaasinka Dalladda Bulshada rayidka ee Puntland (PUNSAA) oo shirkoodi saddex biloodlaha ahaa ee ugu horreeyey shiweynihi 5 aad ee dalladda ka dib ku yeeshay Xarunta dallada ee Garowe, taariikhdu markey ahayd 22 iyo 23 Oktober, 2017 waxay kawada hadleen qodobbo dhowr ah oo ay ka mid yihiin:

1. Dalladdu hawlahey soo qabatey saddexdii bilood ee lasoo dhaafay
2. Hawlaha ay qaban doonto saddexda bilood ee soo socda
3. Caqabadihii ka hor yimid muddadii lasoo dhaafay

Guddiga agaasinku waxay walaac ka muujiyeen xubnaha dalladda oo badankoodu bixin waayey lacagtii ku waajibtay ee xubinimada dalladda, dood dheer kadibna waxay isku raaceen qodobbada hoos ku qoran:

- Sida ay ansixiyeen golaha guud ee dalladdu ururkii ku bixin waaya khidmadda sanadlaha ah ee ku waajibtey ugu danbayn 31/12/2017 inuu luminayo xubinimadii dalladda
- Sida uu Golaha guud ansixiyey shirweynihii 5 aad ee dalladda PUNSAA, ururrada lumiya xubinimadooda waxaa lagu bedeli doonaa ururro cusub
- Wakiillada PUNSAA ee gobolladu waxay mas'uul ka yihiin gaarsiinta ururrada go'aamada kasoo baxay shirkan guddiga agaasinka iyo inay hanti dhowrka dalladda usoo gudbiyaan ururrada bixiyey khidmaddii ku waajibtay iyo kuwa gudan waayey waajibaadkooda
- Sidoo kale guddiga agaasinku waxay isku raaceen in ururrada dalladdu si firfircoon uga muuqdaan deegaamada ay ka hawl galaan, wax qabadkoodana lasoo wadaagaan dalladda.

Mahadsanidiin

Faysal Ahmed Warsame

Gudoomiyaha Dallada PUNSAA

Faysal A



PS